
AWOODDDA SUUGAANTA SOOMALIDA
Mohamed Farah Tahar
2015
Hargeysa, Someiland

AWOODDA SUUGAANTA SOOMALILIDA

Qore: Mohamed Farah Tahar

Sanadkii: 2015

Goobta: Hargeysa, Somaliland

1. HORDHAC: Ereyga, Awooddiisa iyo Qiimihiisa Bulsho

Suugaantu waa inta ugu qiimaha iyo dhadhanka badan afka aynu ku hadalno. Waxaana loo adeegsan jirey siyaabo badan oo faa'iido u leh bulshada, waxayna ahayd waxa kaliya ee ay dadku ku wada xidhiidhaan ta ugu mudan. Qofka suugaan yahanka ahi waxa uu ahaa mid bulshada dhexdeeda magac iyo qiimo ku leh lana sharfo. Sidoo kale waxa uu ahaa qof hadalkiisa la tixgaliyo oo la maqlo. Suugaantu waxa ay leedahay awood dabiiciya iyo xoog faham oo dadku ay ku cushaan.

Waxa jirtey siyaabo badan oo looga faa'iideysan jirey suugaanta ama curinta. Waayadii hore suugaanta waxa loo adeegsan jirey, **guubaabinta, daminta colaadaha, maaweelinta, hasaawaha,** iyo kulamada farxada leh ee bulshadu isugu timaado. Waxaana ay aheyd waxa kaliya ee bulshadu ku kala war qaadato.

1.1. Tusaale: Sharixaadda Awoodda Maansada (Ibraahin Gadhle)

Si loo fahmo awoodda weyn ee ereyga, waxa aynu tusaale soo qaadanaynaa maanso koobeysa awooda sugaantu leedahey oo uu curiyey abwaankii weynaa ee erey helka ahaa **Ibraahin Sulaymaan** oo u magac dheeraa **Ibraahin Gadhle**. Waxaanuu yidhi:

Maansooy nin kugu duul

Nina maalin kugu dood

Nina dhuuni kugu doon

Nina darajo kaa dhigey

Nina nabarka kugu damaq

Nina daqarka ku dhay

Nina doogta kugu kici

Nina ololka kugu dami

Nina nabada kugu didi

Nina balada kugu deyr

Maansooy duciyo kheyr

Ninka kugu dareershiyo

Dabka ruuxa kugu shidey

Ninba dowguu kula maro

Dareenkiisa kugu mari

2. SUUGAANTA: KABAALKA NABADA IYO XALINTA BULSHADA

Xiliga dadka reer guuraaga uu ahaa ee ay dagaalami jireen dhiiga dadkuna uu fududaa beeluhuna ay dagaalka balaayada ku qabeen ayaa waxa suugaantu lahayd kaalin aan la qiyaasi karin oo nabadeed iyo xallin khilaaf.

2.1. Gabaygii Lagu Damiyey Dagaalka (Faarax Nuur)

Waxa la sheegey in laba beelood oo ood wadaag ah xurgufi dhex martey dabadeed hubka iy warmaha ay isku soo gurteen. Intaan balaayadii dhicin ayaa waxa soo kala dhex geley guurti

odayaala oo uu ku jiro abwaankii la odhan jirey **Faarax Nuur**. Markii eregadii la diidey, Faarax Nuur ayaa dabadeed gabeygan ka dhex tiriyey labadii beelood ee doonaayey iney dagaalamaan. Markii uu gabeygii dhameeyey qola waliba waa aqbashey oo dagaalkii halkii ayaa uu ku istaagey.

Anaa mudan anaa midho ku dheer ley hormarimaayo

Waa wuxuu manaayuhu ka dhacey maalintii hore'e

Isku madhaney miidhii cabdiyo madaxii daa'uude

Iyagana magoolkii ka dhimey magaca weynaaye

Anagana mankii naga idlaa miiganaan jiraye

Wax yar oo la maareyn karaa madhiyey iidoore

Kol uunbey manaayadu dhacdaa maanta kala jooga.

3. SUUGAANTA, JACAYLKA, IYO HANTI-RAADISKA DOOBNIMADA

Suugaantu waxa ay ahayd luuqadda ugu sarreysa ee lagu muujiyo dareenka jacaylka iyo in lagu raadiyo hantida (yaradka) ee lagu guursan lahaa.

3.1. Gabaygii Lagu Helay Yaradkii La Diiday (Salaan Carabey)

Salaan Maxamed Xirsi (Carabey) waxa uu doonay gabadh la odhan jirey **Cawo Dhooble**. Reerkeedii ayaa ku yidhi, yaradka waxaad ku soo dartaa faraska **Wagan Xille** ee uu leeyahay abtigaa. Xurguf ba'an oo qoys ayaa jirtey, sidaa darteed faraskii waa loo diidey. Salaan ayaa markaa gabeygan tiriyey. Waxa la sheegey in markii uu gabay la dhex tagey reerkii, gabadhii la siiyey awoodda ereygiisa awgeed.

Wanaag maleh xuseenow aduun la isku waalaaye

Hadaad farasku inuu weynyihiyo wehel dad moodeyso

Galabaa waraabuhu cunaa ama la waayaaye

...

Waji gacalku weysugu qabtaa sheykastoo wacane

Hadaan walaxdu gurigiina iman kuma wareersheene

Wax ku siiyayaa iyo xaajo kale kugu wareejaaba

Kolla waari maayee abtow weris hala i siiyo

3.2. Tilmaanta Faraska iyo Milgaha Abwaanka (Faarax Afcad)

Faarax Afcad faras uu aad u jeclaa oo la odhan jirey **Xamar-dawaaf** ayaa ka dhintey. Wuxuu u baahdey faras la mida kiisii, wuxuuna u tagey niman ay xagga hooyo walaalo ka ahaayeen. Waxa lagu xujeeyey inuu sheego faraska uu doonayaa nooca uu yahay. Faaraxna tix ahaan ayuu ku tilmaamey, waxaana la siiyey faras aad u qiimo badnaa.

Garaadoow bil laba kowsataanbaan, bay ka soo idhiye

Boqonkeygu waa soorognaa, tan iyo beyruuge

Dhulku wixii uu badnaa far iyo, baabacaan dhigaye

Waxba baatirgeel lo iyo, baarqab ha i siinin

...

Sida baarqab geel, buur haleekaado

Sida naagaha billic, ha u bog laalaado

Sida bahalka aaro wax dilli, boodo ha lahaado

3.3. Gabaygii Yaradka Lagu Helay (Cismaan Aadan Dibi)

Cismaan Aadan Dibi gabadh weydiistey nin la yidhaahdo Cadaad. Waxaa lagu xidhay boqol halaad oo yarada, laakiin waxa la ka waayey **Maahir**, hal tilmaan gaar ah laheyd. Cismaan ayaa gabeygan tiriyey si uu aabihii uga dhaadhiciyo hasha qiimaheeda. Aabihii wuu siiyey hashii, sidaana gabadhii ayaa lagu siiyey.

Aaboow malaha waanad arag midab haldhaaleey'e

Aaboow mankii faarax iyo madaxdii weeyaane

Aaboow ma meermeerikaro mayeyna soo hoorye

Aaboow in ley meheshaan maanka ku hayaaye

Aabow hashii Maahir baa magacu saarnaaye

4. SUUGAANTA: SOO CELINTA XOOLAHA IYO Difaaca SHARAFTA

Suugaantu waxa ay ahayd maxkamadda ugu dambaysa ee lagu soo celiyo xoolaha la dhacay iyo in qofka lagu difaaco sharaftiisa bulshada dhexdeeda.

4.1. Gabaygii Geela Lagu Soo Celiyey (Cali Dhuux Aadan Gorayo)

Cali Dhuux Aadan Gorayo geel laga dhacey ayuu u ergoodey, laakiin ragii geela haystay ayaa ka dhaarteen inay soo celiyaan. Cali Dhuux ayaa dabadeed gabeygan tiriyey. Waxa la sheegey in maalintii uu gabeygaa tiriyey habeenimadeedii geelii lagu soo celiyey.

Afar iyo toban hal oo wada gara geela igu siia

Teer iyo gobeysane aniga oo gabana oo wiila

Maantoon guyaal badan jiroo guudku i cadaadey

Labadeena qolo mey dhex marin xaajo godobeede

Iyana ha garan waayinee geela igu siia

...

Inkastooy guyaal iyo guyaal godobi kaa raagto

Mar uun bey dakano soo gashaa gacantii oodneyde

Iyana ha garanwayinee geela igu siiya

...

Hadii geela la i siin lahaa galabta ha i raaco

Hadii kalese caawaba gudaye godobi yeelkeed.

4.2. Difaaca Nafta Gabayga (Faarax Laanjeer)

Faarax Laanjeer oo lagu xaman jiray geel-qaadnimo, ayaa gabaygan isku difaacay markii nin ay ilmaadeer ahaayeen ku yidhi: *(kafadhiiso tuugada, illaah farjkiibaa dhowe)*. Faarax wuxuu gabaygan ku muujiyey in geel-qaadnimadu ay tahay xalaal hore u jirtay oo aanay ahayn xaaraan cusub.

Xoolaha xadiidka ah naftaa xiirayow jecele

Xayaabada kasoofeeka iyo xuukadiyo goolka

Tan iyo xaawa iyo aadan waa u xumadeysneyne

Xaaraan haduu yahay sangaha kuma xaraansheene

Xiitooy ma soo hoysan karo odey xageystaaye

...

Anna wey xalaal xaawis iyo xagalo awryaalle

Ma xayeesh adhaan xadey burcey ka xantamayeene

5. SUUGAANTA, XOREYNTA, IYO MILGAHA NOLOSHA

Suugaantu waxay ahayd awood xoreyn karta qofka maganta ah, waxayna muujinaysay milgaha dumarka iyo abwaanka labadaba.

5.1. Gabaygii Xoreeyey Magantii (Jamaad Cabdulle Xasan)

Jamaad Cabdulle Xasan oo ay walaalo ahaayeen Sayid Maxamed Cabdale Xasan, ayaa magan gashay nin Boqor Oromo ah. Markii nin Boqor ah damcay inuu guursado ayey diidday, iyadoo gabaygan ka dhex tirtay:

Xuseenow qof meel laga hayoo maahsan baan ahaye

Murigaa igu raagtey oo qalbigu waa i madow yahaye

Magantiina maalintaan noqdeen idin miciin moodey

Markab jabey sidiisii weydinkaa noo mohodhiyey

Maatida dabkii laga dhacey iyo maalka noo celiya

Hadii kale waa iga maxruum magaca muusaade

5.2. Gabaygii Xabsiga Laga Soo Baxay (Xuseen Xasan)

Xuseen Xasan oo loo xidhay inuu carqaladeeyo nabadda, ayaa isagoo Berbera ku xidhan, wuxuu tiriyey gabaygan muujinaya doorkiisa aan la waayi karin. Awoodda gabayga darteed, waa la sii daayey.

Si aliyo faduulbaan ku imi sabadan xeebaade

Waligeyba saar iima qaban suudhan doonyaha'e

Senge dhabarkii seymiyo colbaan saami kulahaye

Geelaan sisilada u ahaa sudihii yaa daajin

Dhalinyarada suudhada qubtaan soo sasabaaye

Mar hadaan sahal la ii fureyn sabab la ii waaye

Soodaan madow heyga dhigo soonka dabadeede

5.3. Buuraanburkii Farxadda Dhalmada (Qaali)

Gabadh la odhan jirey **Qaali** oo dhalmo-la'aan lagu xanto jiray, ayaa markii ay uur qaadday ay farxaddeeda ku muujisay burhaanburkan:

Jiilaal cadaadoo cirkii caadna laga waayey

Cadceed kulul abaarti dhacdee

Ciidu ay duushey

Cawadaran caruurtii waxaan

Ciil la dhugatoobey

Ma cawaa nafsigu ii cad jarey

Caadil waa mahade

5.4. Gabaygii Dhaqaalaha ee Dahabka (Cabdi Gahayr)

Cabdi Gahayr markii afadiisii dahab ka codsatay isagoo aan hayn, wuxuu gabaygan ku sharraxay xaaladda dhaqaale adduunka:

Ina cumar qadhooneey aduun qaale bixiwaaye

Qasnadaha ragii keydsan jirey qaarbaa tuugsada'e

Ingiriisba laga qaad dhulkuu, qeybta ku lahaaye

Qarka waxa uu la meermeerayaa, waa nin soo qaxaye

Dayuuraduhu waa qeylo doon, qoorta marayaaye

Qooriga sudeys meylashii kama qamaadaane

Adigaaba qalab doondoonayee quusey faransiise

6. GUNAANAD: AQOONSIGA NOLOSHA IYO HIIGSIGA EREYGA

Awoodda suugaantu waxay gaadhaa illaa heer aqoonsi qaran iyo dhiirigelinta jiilka cusub ee ku aaddan dhaqashada hantida.

6.1. Gabaygii Lagu Codsaday Aroos Qaran (Gaarriye)

Prof. **Maxamed Xaashi Dhamac (Gaarriye)** wuxuu ogaadey in la sharfo qofka marka uu dhinto oo keliya. Sidaa darteed, wuxuu gabaygan ku codsaday in loo sameeyo **Aroos Qaran** isagoo nool (halkii loo samayn lahaa Aas Qaran isagoo dhintay).

Halaguu ilmeeyee

Horta dhimo af maahee

Eegoo la nool yiyo

Ifkaan kaaga baahnahey

Aakhiro markaantago

Iilka igu sugaayoo

Ayaantaan xabaal galo

Oohintaan muteystiyo

Aakownkeyga laga jaro

6.2. Qaabka Gabadha Wanaagsan (Digaale Jaamac)

Digaale Jaamac wuxuu gabaygan gaaban ku tilmaamay gabadha wanaagsan:

Gaari waa gu badhkii

Waa gusoore cusbaadey

Waa gargaarsi aduunyo

Ninkii guule u dhiibo

Gadaalbuu ku gam aa

6.3. Gabaygii Dhaqashada Geela (Aadan Carab)

Aadan Carab wuxuu wiilkiisa u sheegay in geela iyo caanaha aanay ku iman oohin, balse ay u baahan yihiin **dhaqasho iyo dadaal adag**:

Geel ninkaan dhibaatiyo u galin dhac iyo boobtoona

Oon dhaan wareego leh u rarin wabiga dhuuxiisa

Aan suu dhabaha ugu tagnaa dhuuban sibirkiis

Oon rareyga dhaamaha u sida boqonta dhiidhiibin

Oon hilibka dhaan ku cunin dhamac intuu tan iiga samee buuga

#	Magaca Abwaanka / Hal-Abuuraha	Magaca Tixraaca Suugaaneed (Mawduuca)	Habka Tixraaca	Goobta Laga Hayo (Qof ama Kayd)
1	Ibraahin Sulaymaan (Gadhle)	Awoodda Maansada	Isugudbin Af ah (Af-guur)	Ururinta Suugaanta ee Awoodda Ereyga

2	Faarax Nuur	Nabadeynta Beelaha (Anaa Mudan)	Isugudbin Af ah (Af-guur)	Kaydka sheekooyinka nabadeynta
3	Salaan Maxamed Xirsi (Carabey)	Yarad Doonka (Wagan Xille)	Isugudbin Af ah (Af-guur)	Kaydka Suugaanta Jacaylka iyo Fardaha
4	Faarax Afcad	Tilmaanta Faraska (Xamar-Dawaaf)	Isugudbin Af ah (Af-guur)	Ururinta gabayada fardaha iyo hantida
5	Cali Dhuux Aadan Gorayo	Geela Lagu Soo Celiyey (Afar iyo Toban Hal)	Isugudbin Af ah (Af-guur)	Kaydka Suugaanta Geela iyo Ergada
6	Cismaan Aadan Dibi	Yaraadka Lagu Helay (Hasha Maahir)	Isugudbin Af ah (Af-guur)	Kaydka Suugaanta Yaradka
7	Faarax Laanjeer	Difaaca Nafka iyo Geela	Isugudbin Af ah (Af-guur)	Ururinta Suugaanta Difaaca iyo Geel-qaadka
8	Jamaad Cabdulle Xasan	Difaaca Maganta (Oromo)	Isugudbin Af ah (Af-guur)	Kaydka Suugaanta Dhiig-miirashada/Xoraynta
9	Xuseen Xasan	Gabaygii Xabsiga Laga Baxay	Isugudbin Af ah (Af-guur)	Kaydka Suugaanta Xabsiyada iyo Hoggaaminta
10	Qaali	Buuraanburka Dhalmada	Isugudbin Af ah (Af-guur)	Ururinta Suugaanta Haweenka iyo Farxadda
11	Cabdi Gahayr	Cabashada Dhaqaalaha (Dahabka)	Isugudbin Af ah (Af-guur)	Ururinta Suugaanta Hanti-yaraanta
12	Maxamed Xaashi Dhamac (Gaarriye)	Aroos Qaran (Ixtiraafka Noolaha)	Daabacaad iyo Isugudbin Af ah	Kaydka Gabayada Casriga ah (2004)
13	Digaale Jaamac	Qaabka Gabadha Gaarida ah	Isugudbin Af ah (Af-guur)	Ururinta Suugaanta Amaanta Dumarka
14	Aadan Carab	Dhaqashada Geela (Wiilkiisa)	Isugudbin Af ah (Af-guur)	Kaydka Suugaanta Dhaqashada iyo Dhibta